



**Contact:**

Tell: +254-725375783  
+254-727614510

E-mail: [xoriyohrc110@yahoo.com](mailto:xoriyohrc110@yahoo.com)

Ref: .....

Date: ..20..../...09.../...06.....

**XARUNTA XORIYO EE NABADDA IYO WADA-JIRIDDA**

Xarunta Xoriyo ee Nabadda iyo Wadajiridda iyadoo

- **Qiimeynesa** muhiimadda Nabad kuwada noolaashaha iyo wada-jiridda qeybaha kala duwan ee Bulshada.
- **Ka walwalsan** in caqabado xoog lihi ku yimaaddan hannaanka wada hadalada ee dhawaan dhex maray Midowga maxkamadaha iyo xukuumadda KMGS.
- **Walaac ka muujineysa** dhacdooyinka ka soo cusboonaaday gudaha dalka Soomaaliya sida:
  - A. **Fal danbiyeedkii** ka dhacay magaalada Muqdisho **16/Sep/2006da**, kaasoo lala beegsaday, laguna khaarajiyay Sooro Lo, Anella oo aheyd Maamulihii dugsiga Caafimaadka ee SOS.
  - B. **Falkii argagaxa lahaa** ee lala beegsaday kolonyo uu la socday madaxweynaha DFKMG ee Soomaaliya kaasoo sababay ,dhimasho, dhaawac iyo khasaaro kalaba.

Kuwaas oo ka hor-imanaya Dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaalida,qiyamka iyo sidoo kale danaha guud ee bulshada.

1. Waxay **Xaruntu** cambaaraynaysaa khasaarihiikii ka dhashay falalkii argagaxa lahaa ee lala beegsaday madaxweynaha DFKG Soomaaliya iyo sooro Lo' Anello .
2. Waxay **Xaruntu** ku baaqaysaa in la xoojiyo nabadjelyada si looga hortago soo noqnoqoshada faldambiyeedyada noocaas oo kale ah, isla mar ahaantaa dadaal weyn loo galo sidii loo baadi goobi lahaa ,sharcigana loo horkeeni lahaa kuwii ka dambeeyay hawlahaas kharbudaada ah .

3. Waxay **Xaruntu** ugu baaqaysaa urur goboleedyada iyo beesha caalamkaba inay mideeyaan dadaalada ku wajahan dhamaystirka dib uheshiisiinta Soomaaliyeed , si loo gaaro natijjooyin wax ku ool ah.
4. In dhinacyada kala duwan u hawlgalaan sidii loo gaari lahaa nabad iyo wadajirid,horseedda dardar gelinta hay'adihii u adeegi jiray sharciga iyo kala dambaynta ,taasoo ka shidaal qaadanaysa niyadsami iyo rabitaan dhab ah .

Faysal Ciise Saleebaan  
Xarunta Xoriyo ee Nabadda iyo Wadajiridda